# Gaadiidka

Tareenka, Baska iyo Taraamka
Baaskiil / Lug
Gaari / Mooto
Sharciga Darawalnimada

# Tareenka, Baska iyo Taraamka

Gaadiidka dadweynaha ee Swiserlaan waa kuwo aad looga shaqeeyay. Caadi ahaan deegaan walbo oo wadankan kuyaalo waxaa lagu tagi karaa Tareeno, basas ama Taraam. Gaadiidka dadweynaha waa kuwo ku yimaado waqtigooda waxayna baxaan waqtiyo go'an oo joogto ah.

## Gaadiidka Dadweynaha

Gaadiidka dadweynaha ahmiyad sare ayay siisaa Swiserlaan. Maadama deegaan walibo marar badan saacadii lagu tagi karo tareen, bas ama Taraam ayay dad badan oo safar ah isticmaalaan gaadiidkan. Isticmaalka gaadiidkan Waxaa kuu baaqanayo lacago Inkastoo Qiimaha gaadiidka dadweyanaha mid yara qaalisan yahay. Waxaa fiican inaad iibsato kaarka qiimo dhimista ama aad rukumato kaarka lagu raaco gaadidka. Kaarka aan lacagtiisu aadka u badnayn ee Qiimodhimista (Halbtaxabonnement) tusaale ahaan Swiserlaan oo dhan ayaad ku raaci kartaa nus kamid ah qiimahii caadiga ahaa.

## Kaararka gaadiidka dadweynaha

Qofkii doonaya inuu raaco tareen, waa inuu goostaa tikit (Billett) intuu tareenku dhaqaaqin. Tareenka dhexdiisa lagama iibsan karo Tikit. Basaska iyo Taraamka qaabab kale duwan ayaa loo goostaa Tikidhadooda. Boosteejo walba oo SBB Tareenkeedu istaago ama laga raaco iyo inta ugu badan boosteejoyinka Basaska waxaa laga helaa mashiinada laga iibsado Tikidhada, Boosteejoyinka waaweeyn sida kuwa tareenada iyagu waxay leeyihiin sidoo kale Xafiisyo laga iibsan karo tikitka. Haddii loo baahdo Tikitka waxaa sidoo kale laga iibsan karaa interneetka ama Taleefanada dhexdooda. Dadka inta badan ku safro gaadiidka dadweynaha waxaa jiro Tikidho kala duwan oo ay rukumaan karaan. Waxaa lahelaa kuwo meelo dhow, deegano gaar ah ama Swiserlaan oo dhan lagu tagi karo (Generalabonnement). Caruurta ka yar 6 sano wax tikit ah lagama rabo. Caruurta ka yar 16 sano waxay kula raaci karaan waalidiintooda si aan bilaash waxba dhaamin haddii ay haystaan tikitka caruurta kula raaci karaan waalidkooda. Macluumaad ku saabsan Tikityada caadiga ah iyo kuwo la rukuman karo waxad ka helaysaan Xarumaha Tareenada Swiseerlaan ee SBB ama Shirkadaha gaadiidka dadweynaha.

## Shirkada gaadiidka dadweynaha ee Waqooyiga Galbeed Swiserlaan TNW

Shirkada gaadiidka dadweynaha ee Waqooyiga Galbeed Swiserlaan TNW waxay ku bixisaa qiimo gaar ah Tikityada, Tikityada la rukunto iyo Tikityada maalinlaha ah ee lagu tago Basel iyo nawaaxigeeda. Shirkada gaadiidka dadweynaha ee Waqooyiga Galbeed Swiserlaan TNW goobaha lagu tagi karo Tikityada waxay u kala saartay qaybqayb. Qofkii Gobolada Waqooyiga Galbeed ee Swiserlaand inta badan ku socdaalo Taraam, Bas ama Tareen waxuu ka faa'ideysan karaa Tikitka la rukunto ee U-Abo. Tikitkan waxaa lagu tagi karaa dhammaan meelaha ay ka shaqeyso shirkada TNW iyo Xuduudaha dibadda ee inoo dhow. Qofkii doonaya inuu ka tilaabo meel kabaxsan goobaha shirkadu tikityadeedu ka shaqeeyaan waxuu u baahanyahay Tikit gooni ah.

## Kaarka maalinlaha ah ee laga iibsado Xafiiska Degmada

Qofka qorsheynaya inuu safarro dhaadheer ku maro Swiserlaan wuxuu xafiisyada degmooyin badan oo Swiserlaan ah ka iibsan karaa Kaarka maalinlaha (Gemeindetageskarte) ee lagu tagi karo Swiserlaan oo dhan qiimo jaban. Si kastaba ha ahaatee Fursadaan waa mid xadidan sidaas darteed waa in waqti hore lasii carbuuntaa. Xog kusaabsan waxaa kula wadaagayo Maamulka degmadaada.

## Qadka Habeenka

Usbuuca dhamaadkiisa (Habeenada Sabtiga iyo Axadda soo galayso) waxaa sidoo kale saqda dhexe ka shaqeeya Basel-Stadt iyo meelaha u dhow gadiidka dadweyanaha sida Taraamka, Basaska iyo Tareenada. Qadka Habeenkii ee Shirkada TNW wax lacag dheeri ah oo la iska qaado majirto.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/mobilitaet/zug-und-bus

# Baaskiil / Lug

Waddooyin aad u qaabeysan oo u gaar baaskiilada ayaa Gobolka Basel-Stadt waditaanka Baaskiilka ka dhigaayo mid aad u fiican. Shaqaale badan ayaa ku tago goobahooda shaqada Baaskiil. Dadka lugta kusocda iyo kuwa luga baxsanaya waxaa iyana sidoo kale loo sameeyay goobo u gaar ah oo ay kusocon karaan.

## Kusocoshada Lug ama Baaskiil

Basel-Stadt isticmaalka lugta iyo baaskiilada waa mid xiiso leh inta badana aamin ah. Masaafoyinka gaaban dad badan oo baabuur leh ayaan u isticmaalin gaari. Meelo badan oo waxaa jiro calaamadaha baaskiilka iyo wadooyinka baaskilka leh. Dadka lugeynaayo meelaha u gaarka dadku inay maraan, iyagaa mar walbo u xaqleh wadada (marka laga reebo wadooyinka samaafaraha leh). Gobolka Basel-Stadt waxay leedahay meelo quruxbadan oo loogu tala galay in lagu socdo ama lagu lugabaxsado marka qofka fasaxa yahay. Goobaha lugta kaliya lagumaro waxaa ku yaalo boorar jaallo ah oo ku tilmaamayo.

## Sharciyada dadka isticmaala Baaskilka

Inaad kusocoto Baaskiil wadanka Swiserlaan uma baahnid Shati gooni ah iyo waliba imtixaan inaad u marto. Dadka Baaskilka waa in ay si guud u ilaaliyaan Sharciyada Wadooyinka si lamid ah darawaliinta gawaarida. Hadii wadadu leedahay meelo loo gaar yeelay Baaskilka inuu maro ama loo calaamadeyay waa inaad isticmaasha halkaas. Baaskiilku waa inuu ahaadaa mid u qalmo in lagu wado wadooyinka (labo bareeg oo fiican, gambaleel, caakisaadka cagaha hore/dambe iyo halka cagta lasaaro ifiya, Nalalka hore iyo kuwa dambe). Koofida birta ah inaad xirato qasab kuguma ahan inaad xirato marka aad baskiil wadayso laakin waalagu isku dhiirigeliyaa. Dadka isticmaala Baaskiilka si kastaba ahaatee waxaa la gudboon inay ku jiraan Ceymiska Magdhowga Gaarka ah maadama laga rabo magdhowga hadii ay dhib u geystaan (Dad ama duunyo).

## Barashada Kaxeeynta Baaskiilka

Qofkii doonaya inuu barto sida loo kaxeeyo Baaskiil, wuxuu booqan karaa koorso. Koorsoyinka waxaa bixiyo Kooxda Pro Velo. Koorsooyin qaar oo u gaar ah ayaa jiro ajaanibta. Baaskiilo raqiis ah oo lasoo isticmaalay waxaa laga heli karaa Suuqa Celiska Baaskiilada (Velobörsen).

## Baaskiilka lala raaco Gaadiidka dadweynaha

Qofkii doonaya inuu Tareen ama Bas la raaco Baaskil wuxuu u baahanyahay Tikit gaar ah. Macquul ma ahan marwalba iyo meel walba inaad la raacdo Baaskiil. Mararka qaar tareenada waa inaad sii carbuunataa.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/mobilitaet/fahrrad--zu-fuss

# Gaari / Mooto

Swiserlaan waxaa jiro leeyman wadooyin oo aad u qaabeysan. Isticmaalka wadooyinka inta ugu badan waa bilaash. Sharciyada wadooyinka waxay leeyihiin macno weyn. Haddii la ilaalin waayo sharciyadaas ganaaxu waa mid sare.

## Sharciyada Wadooyinka

Sharciyada wadooyinka waxay ahmiyad sare u leeyihiin Darawalada gaadiidka Swiserlaan. Marka loo eego wadama kale ganaaxyada Swiiserlaan waa kuwo sare. Xadgudubka sharciyada wadooyinka ee aadka u weyn waxay horseedi kartaa in lagaa qaado Leeysinka.
Sharciyada qaar ee muhiimka ah:

- Xawaaraha ugu badan ee magaalada dhexdeeda lagu wadi karo gaariga: 50 km/Saacadiiba; Magaalada banaankeeda: 80 km/Saacadiiba, Wadada Gawaarida: 100km/Saacadiiba, Wadada degdegta: 120 km/Saacadiiba
- Wadada degdegta ah in midigta la isku dhaafo waa mamnuuc; midigta markaad ku socoto waa inaa taxadar muujisaa haddii leeynka bidix ama kan dhexe baabuurta isku xiranyihiin.
- Nalka waa in sidoo kale maalintii uu daarnaada.
- Dhammaan dadka gaariga saaran waa in ay suunka xirtaan.
- Caruurta waa in kursiga caruurta ay ku fadhiyaan (ilaa 12 sano jir ama caruurta dhirirkoodu yahay hal mitir iyo bar)
- Gaariga marka lawado kaliya waxaa la ogolyahay in lagu hadlo taleefan sameecadda gaariga ku xiran.
- Waditaanka gaariga adoo cabsan khamri ama daroogaysan waa la isku ciqaabaa ( Xadiga la ogolyahay ugu badnaan 0.5 barmiil)
- Dadka lugeynaayo meelaha u gaarka dadku inay maraan iyagaa mar walbo u xaqleh wadada (marka laga reebo wadooyinka samaafaraha leh).

## Lacagaha Wadooyinka

Wadooyinka waxaa maalgeliyo Dowlada federaalka, dowlada hoose iyo degmooyinka. Isticmaalka wadooyinka waa bilaash. Marka laga reebo wadooyinka degdegta ah: Qofkii rabo inuu isticmaalo wadooyinka degdegta lagu maro waa inuu iibsadaa sanad waliba warqad yar oo lagu dhajiyo muraayadda hore ee gaariga (Vignette). Waxaa laga iibsan karaa goobaha shidaalka lagaga shubto, xafiiska Boostada ama Hay'adaha Gaadiidka.

## Ceymiska

Swiserlaan waxaa la ogolyahay in la isticmaalo kaliya gaadidka motoorka ku shaqeeya ee ku jira ceymis. Ceymiska Magdhowga ee gaadiidka ku shaqeeya motoorka (Motorfahrzeug-Haftpflichtversicherung) waxaa laga sameysan karaa shirkado badan. Ceymiska wuxuu bixiyaa qasaaraha naf iyo maal ee uu sababay gaariga. Ceymiska gaarigaada waxaa jiro Ceymisyo dheeraad ah oo aan qasab ahayn oo aad u sameysan karto (Kaskoversicherungen). Fiiro gaar ah: Haddii qofku si mas'uuliyad darro ah qasaare u sameeyo ma bixiyaan ceymiska (Tusaale ahaan, Waditaanka gaariga adoo cabsan khamri ama daroogaysan). Ceymiska Magdhowga ee gaadiidka ku shaqeeya motoorka lama mid aha Ceymiska Magdhowga Gaarka ah.

## Soo dhoofinta Gaadiidka ku shaqeeya motoorka

Qofkii doonaya in gaadiid motoor ku shaqeeya si toos ah Swiiserlaan ugala soo dago waa inuu wargeliyo waaxda canshuuraha si loo canshuuro. Gadiidka waa in lasoo hubiyo farmamo ahaan inuu bad qabo. Waxaa loo baahanyahay Ceymiska Magdhowga ee gaadiidka ku shaqeeya motoorka, Sharciga gawaarida oo Swiis ah iyo Lambar taariko oo Swiserlaan ah. Xog dheerad ah waxaad kaheli kartaa Qaybta baarista Gaadiidka ee Basel-Stadt (Motorfahrzeugkontrolle).

## Gaari Qaybsi

Gaari Qaybsi waxa lagala jeedaa, in dad badan hal gaari ama kabadan ay wada isticmaalaan. Gawaarida Ururka Gaari Qaybsiga waxay inta badan yaalaan goobaha la dhigto gawaarida oo u gaar ah waxaana laga carbuuntaa Onleeynka ama Taleefanka. Goobaha laga helo gawaarida inta badan waxay aad ugu dhowyihiin halka ugu dambaysa ee gaadiidka dadweynuhu istaagaan (Tusaale, Boostejada Tareenada, Taraamyada ama halka ugu dambaysa ee Basasku istaagaan). Farqiga u dhexeeya kireeysashada Gawaarida waa in Gaari Qaysiga macquul tahay in Saacado kaliya ad kusoo daneeysan karto.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/mobilitaet/auto--motorrad

# Sharciga Darawalnimada

Si laguugu ogolaado inaa gaari ku dhex wadato Swiserlaan waxaa lagaaga baahanyahay Sharciga Darawalnimada oo aan dhacsanayn. Sharciyada darawalnimada ee wadamada kale waa in marka aad soo degto Swiserlaan laguu badalo.

## Sharciga darawalnimada ee Wadamada kale

Qofkii soo dega Swiserlaan isagoo sita sharciga darawalnimada ee dibadda uu kalayimid waa inuu 12 bilood gudahood ugu badasho Sharciga Darawalnimada (Führerausweis) ee Swiserlaan. Sidaas darteed waa inuu codsi u qortaa Qaybta baarista Gaadiidka ee Basel-Stadt (Motorfahrzeugkontrolle). Hadba wadanka bixiyay Sharciga darawalnimada ayay ku xirantahay shuruudo ku xiran badalida Sharciga. Waxaa dhici karta in loo baahdo Imtaxaanka darawalnimada ama in Darawaliintu imtaxaanka aragtida guud ku baasaan. Qaybta baarista Gaadiidka ee Basel-Stadt ayaa kula wadaagi macluumaad dheeri ah.

## Imtaxaanka Darawalnimada

Swiserlaan si aad u hesho sharciga darawalnimada waxaa lagaaga baahanyahay imtaxaan inaad marto. Imtaxaanka darawalnimada wuxuu kakoobanyahay Qayb aragti guud ah iyo qayb kaxeeynta gaariga ah. Imtaxaanka waxaa loo ogolyahay inay galaan kaliya dadka da'doodu kawayntahay 17 sano. Shuruudaha iyo macluumaad dheeri ah waxaa kula wadaagi doona Qaybta baarista gaadiidka. Waditaanka Gawaarida xammuulka, basaska iyo Tagaasida imtixaano gaar ah ayaa loo maraa.

## Macluumaad dheeraad ah (linkiyo, cinwaano, waraaqaha macluumaadka, buug-yaraha)

www.hallo-baselstadt.ch/so/mobilitaet/fuehrerausweis